## Dhibaatooyin suuragala

**Inay PEG xiranto:**

- Haddii tuubbada nafaqo qaadashadu xiranto, isku day inaad biyo raaciso. Xoog ha isticmaalin, waayo tuubbadaa dillaacaysa. Waxaa kaloo laysku deyi karaa in ayadoo lagu celcelinayo biyo lagu soo nuugo.
- Haddii kale ka buuxi tuubbada biyo diirran, ama 1/8 (tumunka) qaaddada shaaha oo ah qamiir oo aad ku dartay 5 ml oo biyo ah, soona nuug markii ay 20 daqiiqadood ku jiraan tuubbada kadib.
- Tuuji tuubbada haddii meesha xirantay muuqato.
- Coca Cola-ha iyo walxaha kale ee aashitada lihi uma fiicna, waayo aashitadu waxay sababtaa inay sii adkaadaan barootiinnadu oo dhibtii/gunudkii kasii daro.
- Haddii ay haddaba tuubbadu furmi weydo, waa in la beddelo (waxaa beddela dad khibrad u leh).

**Ka hortagga inay PEG dhacdo:**

- Haddii PEG ay tahay nooca caloosha lagula qabto buufinku, waa in muggeeda toddobaad walba la koontaroolaa oo la buuxiyaa haddii biyaha ku jiraa ay yaryihiin. Qadarka oo ku cabbiran milliliter (ml) wuxuu ku qoran yahay waalka tuubbada.
- Bukaanka dhaqdhaqaaq ahaan aan deggenayn/jaah-wareersan waa in tuubbada la daboolo (ayadoo la isticmaalayo faashad/suun/qalabka lagu celiyo dhexda iyo dhabarka, ama wax kale) si aan tuubbada loo soo saarin ayadoon lagu talagelin.

**Haddii ay PEG soo dhacdo:**

- Marinka PEG ee maqaarka dhex maraa wuxuu isku buskoonayaa saacado gudahood, haddii aanu furraan.
- Si aad furnaanta ugu haysid, geli tuubbada kaadi-haysta lagu xiro oo lagu nadiifiyey bakteeriyo-dile, ama wax la mid ah si kanaalku u furnaado.
- Kadib la xiriir isbitaalka si tuubbada nafaqo qaadashada PEG dib loogu rakibo. Tuubbadii nafaqada PEG ee shaqadeedii gabtay waa in la wado marka bukaanku isbitaalka imaanayo.

**Looxaddaa soo dhacday, ama si kale ayaa PEG u xumaatay:**

Kala xiriir rugta caafimaad ee bukaan-socodka: 23 22 57 20

**Lalabo, shuban, calool-adkaan (saxarada), hingo, laabjeex, ama dhibaato la mid ah:**

La xiriir khabiirka nafaqooyinka (ernæringsfysiolog)

01-2020 somali

# PEG

## Perkutan Endoskopisk Gastrostomi



## Warbixin ku saabsan daryeelka iyo hagaajinta kadib gelinta tuubada nafaqada ee caloosha (PEG)

Lovisenberg Diakonale Sykehus

## Waa maxay PEG?

- PEG (Perkutan Endoskopisk Gastrostomi) waa tuubbo dhuuban oo jilicsan oo la geliyo maqaarka oo loo gudbiyo gudaha kiishka caloosha.
- PEG  waxaa inta badan loo isticmaalaa in nafaqo la siiyo dadka ay cunto-liqistoodu daciiftay muddo dheer.
- Tuubbada nafaqada ee PEG waxaa caadi ahaan la geliyaa ayadoo la isticmaalayo qalab lagu arko gudaha, ayadoo meesha laga gelinayana ay kabuubyaysan tahay.

## Markii tuubbada la geliyo:

- 2-da saacadood ee ugu horreeya waa in tuubbadu furnaato, si hawada caloosha ku jirtaa ay u bixi karto. Taa waxaa loo samaynayaa inaysan dhibi ka imaan hawadii gashay caloosha markii tuubbada la gelinayey.
- Tuubbada PEG waa la isticmaali karaa 2-4 saacadood kadib markii la geliyey.
- Marka ugu horraysa waxaa tuubbada laga siiyaa qofka 60 ml oo ah biyo la nadiifiyey:
  - Haddii aanay taasi xanuun keenin, waa la bilaabi karaa siinta nafaqada.
    Haddii la arko in siintii biyihii nadiifka ahaa ay xanuun keentay, dhakhtar ayaa go’aaminaya marka isku-day kale la samaynayo.
- Maalinta hore waa in looxadda ugu sarraysaa ay ku dheggenaato maqaarka laakiin waa inaysan aad u hayn.
- 24 saacadood markii lagu xiray tuubbada nafaqada kadib, ayaa la furayaa looxadda sare. Tuubbada nafaqada waxaa 2-3 sentimetir loo riixayaa hoos, waxaa la wareejinayaa 360 digrii, kabacdina kor baa loosoo jiidayaa ilaa la dareemo inay hoos kaga dhegtay kiishka caloosha. Markaa kadib ayaa dib loo xirayaa looxadda sare.
- Looxadda  sare hadda wixii ka dambeeya waa inay ku xirnaato in u jirta 5-10 mm maqaarka.

## Beddelista PEG:

- Tuubbada nafaqada ee PEG uma baahna in la beddelo haddii aanay xirmin, googo’in, ama cillad kale ku dhicin.
- Waxaa suuragal ah in tuubbada nafaqada ee PEG lagu beddelo nooc ka gaaban (badhan) ugu yaraan saddex bilood kadib, haddii sidaas la doonayo.

## Cunto-ka-qaadashada PEG:

- Maalmaha ugu horreeya ayay tahay in la eego in lagu kabo dareere/nafaqo loo mariyo xididdada haddii aanu bukaanku ka helin dareeraha iyo nafaqada lagama-maarmaanka ah tuubbada nafaqada PEG.
- Qaybta saableyda ee bukaanka waa in kor loo dhigo 30-45 digrii inta cunto-siintu ku socoto, iyo weliba 30-60 daqiiqadood kadib. Taasi waa si looga hortago in wixii caloosha ku jiray u jiidmaan sambabbada, taasna ay ka dhalato caabuqa sambabka.
- Tuubbada nafaqada PEG waxaa loo isticmaali karaa dhammaan dareerayaalka kala duwan. Biyo, saafti, caano, sharaabka nafaqada, dawooyinka sharoobbada ah, ama kiniiniyaal la burburiyey oo biyo lagu qasay.
- OGOW: kiniiniyaalka muddada dheer (siday u badan tahay) lama burburin karo. Kuwaas waa in caadi ahaan lagu beddelo qaab-daweed kale.

## Hagaajinta PEG:

- PEG waa in la nadiifiyaa maalin walba maalmaha hore (ilaa buskoodka jidhku soo muuqdo, sida caadiga ah hal toddobaad). Kadibna 2-3 maalmoodba mar.
- Jidhka inta ku wareegsan afka tuubbo-nafaqeedka PEG waxaa toddobaadka koowaad lagu mayrayaa/nadiifinayaa jeermis-dile.
- Ku mayr biyo iyo saabuun haddaad qubaysanaysid kadib 1-2 toddobaad.
- Taxadar u qallaji, adigoo hubinaya inay qallalan tahay meesha ka hoosaysa looxadda xiridda. Ma aha lagama maarmaan in faashad-cudbiyeedka qaybsanta la hoos geliyo looxadda xiridda, haddii aanu bukaanku dareemayn in looxaddu xaganayso.
- Mar walba oo tuubbo-nafaqeedka PEG la isticmaalo waa in lagu biyo raaciyaa biyo gaaraya 20-40 ml. Taa waxaa loo samaynayaa si aanay tuubbadu u xirmin.

.